COMMUNITY EDUCATION
Saint Paul Public Schools

ECFE

EARLY CHILDHOOD
FAMILY EDUCATION
COMMUNITY EDUCATION

ECFE waa barnaamij ka mid ah barnaamijyada Waxbarashada Dadweynaha ee Community Education Department ee Saint Paul Public Schools (SPPS).

WAXAAN XOOJINNAA QOYSASKA ANNAGOO SIINAYNO WAXBARASHO.

KU SOO DHAWOOW ECFE!

NALA SOO XIRIIR

SPPS.ORG/ECFE
ECFE@SPPS.ORG

English: 651-793-5410
Hmoob: 651-744-4816, 612-590-8035
ကညီကျိ: 651-216-8105 (cell), 651-744-4861
Soomaali: 651-744-2727, 651-216-7640 (taleefan gacanta)
Español: 651-744-4815, 651-306-2251 (taleefan gacanta)
Khadka Mareykanka Madow ee FCW: 651-744-2773
Waxbarashada Baahiyaha Gaarka ah ee FCW: 651-230-6583

SITE CONTACTS
CALL OR TEXT

Belvidere: 763-388-3440
EC Hub West: 763-388-3551 (Ladybugs)
EC Hub West: 612-930-7778 (Butterflies)
Highland Park: 612-930-7660
Highwood Hills: 651-802-0283
Rondo: 651-802-3568
Wheelock: 651-802-2668 (Yellow Duck)
Wheelock: 651-900-2039 (Green Frog)

WAXAANU HALKAN U JOOGNAA WAA ADIGA. NAGALA SOO XIRIIR WIXII SU'AALO AH.

651-793-5410

SOO XAADIRIDDA

Barnaamijka ECFE wuxuu furan yahay September ilaa billowga June. Caadiyan barnaamijkeennu wuu xiran yahay marka dugsiyada hoose ee SPPS ay xiran yihiin.

Xilliyada aynu xirannahay waxaa ka mid ah maalmaha MEA, fasaxa Thanksgiving, Fasaxa Qaboobaha, Maalinta MLK, Maalinta Madaxweynayaasha, Fasaxa Gu'ga, iyo Maalinta Memorial Day, iyo sidoo kale maalmaha horumarinta xirfadeed iyo kulmada macallimiinta iyo waalidka ee SPPS.

Kal-tirsiga ECFE waxaa laga arki karaa bogga ECFE.

MAQNAANSHAHA

Haddii aad u baahan tahay inaad fasal ka maqnaatid, la xiriir Macallinka Waalidka (Parent Educator). Boosaska bannaan ee fasallada iyo basaska waa mid aad u kooban oo barnaamijyadeenna badanaa waxay leeyihiin qoysas ku jiro liisaska sugitaanka.

Haddii qoysaska ay maqnaadaan fasallada 3 maalmood iyo in ka badan oo isku xigta, waxaa laga yaabaa in laga saaro fasallada iyo/ama ay waayaan gaadiidka qaado. Qoysaska laga saaray barnaamijka waxay dib isugu diiwaangelin karaan fasalka markii ay go'aansadaan inay si joogto ah u yimaadaan fasalka, taasoo ku xiran in boos loo heli karo.

GAADIIDKA

BARNAAMIJKA ECFE WUXUU FASALLADA QAARKOOD SIIYAA GAADIID XADDIDAN

Haddii aad heysatid gaadiid aad adigu leedahay, fadlan u dhaaf gaadiidka qoysaska aan ka qaybqaadan karin barnaamijka ECFE basas la'aan.

La xiriir macallinkaaga waalidka ama isku qor helidda "Gaadiidka" haddii aad ku dhibtooneyso inaad ka qeybgashid barnaamijka ECFE sababo la xiriira gaadiid la'aan.

TILMAAMAHA WAXYAALAHA LA ISKA DOONAYO RAACIDDA GAADIIDKA

- Wax cunto ah lama oggola gudaha baska.
- Wac oo u sheeg macallinkaaga iyo/ama darawalkaaga haddii aadan imaan doonin.
- Waxaa laga yaabaa inaad weysid gaadiidka haddii aad maqnaatid 3 fasal/ama aadan baska raacin 3 jeer oo isku xigta.
- Keliya shakhsiyaadka ka diiwaangashan barnaamijka ECFE ayaa raaci karo basaska.
- Xilliyada ay basasku qoysasku qaadaan ama dejiyaan way isbeddeli karaan maadaama ay qoysasku ku soo kordhaan ama ka haraan barnaamijyadeenna.
- Diyaar u noqo baska 5 daqiiqo ka hor wakhtiga baska loo qorsheeyay inuu ku qaado.

KA QEYB-GALKA QOYSKA

WAXBARASHADA WAALIDKA WAXAY UDUB-DHEXAAD U TAHAY YOOLKA ECFE, IYO SOO XAADIRID JOOGTO AH.

KA QEYB-GELIDDA WAXBARASHADA WAALIDKA WAA LA ISKA DOONAYAA.

KA QEYBQAADASHADA BARNAAMIJKA:

Waaliddiinta/Daryeelayaasha carruurta waa inay ka qeybgalaan dhammaan barnaamijyada ECFE, kaasoo sida caadiga ah ay ka kooban Isdhexgalka Waalidka/Carruurta, Wakhtiga Xalqada, iyo Waxbarashada Waalidka.

Inta lagu jiro Waxbarashada Waalidka, macallinka waalidka ee laysin heysta ayaa hagaya oo daadihiniya wada-hadalka fasalka, wuxuuna bixin xogo iyo ilo kheyraad, wuxuuna raacayaa Manhajka MN MDE ee Waxbarashada Waalidka.

TILMAAMAHA WAALIDKA IYO CARRUURTA FASALKA JOOGO

BEDQABKAAGA KU DEDAAL. Cabitaanno kulul looma oggola in lala yimaado fasallada carruurta. Xajiso oo ha dayicin waxyaalaha qaaliga ah.

KA MID NOQO BULSHADHA FASALKA: Noqo qof furan oo daacad ah. Mas'uul ka noqo waxbarashadaada. Si firfircoon uga qaybqaado fasalka.

NOQO MID XUSHMAD MUUJIYO: Waxaa jira siyaabo badan oo wanaagsan oo uu waalidku hawshiisa waalidinimo u qabsan karo. Dhowr siraha qarsoodiga u ah fasalka. Nadiifi booskaaga markii aad wax isticmaashid. Xushmee fikradaha kala duwan.

PAC

KooxdaThe Saint Paul ECFE All-City Advisory Council (PAC) waa Golaha La-talinta Magaalada oo dhan (PAC) oo waa koox ka mid ah waaliddiinta mutadawiciinta ah ee barnaamijka ECFE. Qof walba waa la soo dhaweynayaa (waana lagu dhiirrigelinayaa) inuu ka qeybgalo kulamada waalidka ee PAC.

FASALLADA CARRUURTA

NAQSHADDA WAXBARASHADA FASALKA

ECFE waxay bixisaa jawi waxbarasho oo soo dhoweyn iyo soo jiidasho leh kaasoo loogu talagalay dhallaanka yar, labo-jirrada, iyo ardayda gaartay da'da xannaanada. Wuxuu barnaamijku leeyahay qalab iyo hawlo ammaan ah oo ku habboon da'da carruurta. Fasallada iyo duruusta waxaa loogu talagalay carruurta yaryar iyadoo ay diyaarsheen macallimiin heysata laysin oo raacaya Tilmaamayaasha Horumarka Carruurnimada Hore ee Minnesota (Early Childhood Indicators of Progress).

TALO QUSEYSA MARKII LA KALA KAXEENAYO WAALIDKA IYO ILMAHA

Fasallo badan oo ECFE ah waxaa ka mid ah xilli la kala soocayo waalidka iyo ilmaha, taasoo loogu talagalay carruurta inay wax ku bartaan qaab ciyaar ah halka waaliddiinta/daryeelayaasha ay qaadanayaan duruusta Waxbarashada Waalidka. Waa wax iska caadi ah walaaca la xiriiro kala soocidda waalidka iyo ilmaha. Waxaan kugula talineynaa talooyinkan inta aad kala qabsanaysid kala soocidda waalidka iyo ilmahaa oo guuleysta:

Mar walba dheh nabadeey. Marka aad dhahdid nabadeey, waxaa muhiim ah inaad si dhaqso ah qolka uga baxdid.

Caawimaad codso. Shaqaaluhu waxay halkan u joogaan inay kaa caawiyaan inaad dareentid kalsooni ku aaddan kala soocidda adiga iyo ilmaha si adiga iyo ilmahaagu aad u dareentaan caadi.

Sabir yeelo: Shaqaaluhu waxay dejin doonaan carruurta sabab uun la walaacsan, wayna ku soo wici doonaan haddii loo baahdo.

CAAFIMAADKA & AMMAANKA

TALLAALADA

Sharciga Minnesota wuxuu doonayaa in barnaamijka ECFE uu haysato diiwaankii u dambeeyay ee galka tallaalka carruurta.

TILMAAMO DHEERAAD AH

CAADOOYIN CAAFIMAADKA LA XIRIIRO

- Dhammaan xubnaha qoysku waa inay gacmahooda dhaqaan marka ay yimaadaan ECFE.
- Ku rid alaabta lagu ciyaaro ee afka la geliyay caagga lagu siiyay si ay shaqaalaha ECFE u nadiifiyaan.
- Ku beddel xafaayadda kaliya meelaha loo qoondeeyay in lagu beddelo oo raac tilmaamaha nadaafadda ee meelaha ku qoran.
- Xeerka Guddiga Waxbarashada wuxuu si adag u mamnuucayaa sigaar-cabista ama isticmaalka tubaakada markii la joogo goobaha degmada SPPS.

JIRRO

Fadlan guriga joog haddii adiga ama carruurtaada aad jirran tihiin. ECFE waxay fasalka ka reebi kartaa qoysaska qabo jirrooyinka ay ka mid yihiin:

- Heerkulka afka oo ah 100 digrii ama ka sarreeya
- Fin aan la ogaan, ama mid wato jirro
- Matag
- Diif badan
- Xanuun faayrus ama bakteeriya ah
- Si joogto ah u hindhisayo ama qufacaya
- Dhego xanuun
- Dhuun xanuun
- Indho guduudan oo da'ya
- Shuban
- Ardayga oo caajisan, dugsigana aan si nashaad leh u iman karin

U DIYAARGAROWGA XAALADAHA DEGDEGGA AH

ECFE waxay qabataa tababarradaan la isugu diyaarinayo xaaladaha degdegga ah, oo ay ku jiraan: Dabka/Bixidda Degdegga ah, Duufaanta/ Cimilada Xun, Fasalka oo Hoosta laga Qafilo, Iskoolka oo la Qafilo, Fasalka oo Meeshiisa lagu Hayo Dhaqdhaqaaq la'aan.

WARAAQAHA LA ISKA DOONAYO:

Foomamka Tallaalka, Shahaadooyinka Dhalashada, Foomka Oggolaanshaha Isticmaalka Sawirka

ISTICMAALKA MAANDOORIYE:

Waa mamnuuc isticmaalka tubaakada, khamriga, xashiishka, ama walxaha la xakameeyay.

CUNTADA FUDUD

Carruurta waxaa la siiyaa cunto fudud. Fadlan guriga ha ka keenin cunto fudud. U sheeg shaqaalaha wixii xasaasiyad ah ee ilmuhu qabo.

BAAHIYAHA GAARKA AH

ECFE waxay ka caawin kartaa qoysaska inay helaan in carruurta la qiimeeyo oo la eego haddii ay jirto baahiyaha gaarka ah iyo/ama helitaanka adeegyada. Fadlan arrintan kala hadal macallinkaaga.

WARBIXIN WAAJIB AH

Sharciga gobolka wuxuu farayaa dhammaan shaqaalaha ECFE inay soo sheegaan wax walba oo la rumaysan yahay inay yihiin kuwo la xiriiro caddib jirka, shucuurta, iyo/ama galmada ah.

DHARKA

Adiga iyo carruurtaada u soo labista si nashaad leh oo aad ciyaari kartaan. Ciyaartu waxay noqon kartaa mid wax kugu daadan karaan.

XAFAAYADDA/MUSQUL

Qoysasku waa inay carruurtooda geeyaan musqusha/beddelaan xafaayadda ka hor billowga fasalka. Meelo ayaa jiro loo qoondeeyay lagu beddelo xafaayadda. Fadlan raac habraacyada qoran ee lagu dhajiyay goob walba.

XIRITAANKA ISKOOLKA

Marka ay SPPS baajiso iskoollada, ECFE sidoo kale waa la baajin doonaa. Haddii baajin dheeraad ah lagu sameeyo barnaamijka ECFE, qoysaska waxaa lagu ogeysiin doonaa qoraal iyo/ama iimayl.

BOOQDAYAASHA

Ma meelayn karno shakhsiyaadka aan ka diiwaangashaneyn barnaamijka ECFE.

Qoysaska: Ka qeyb-gala duruusta barnaamijka. Fadlan aamusi oo xaree telefoonnada gacanta.